# 5 Waxyaabood oo Laga Ogaado Xuquuqahaaga Sharci Kadib Marka Cudur Lagaa Helo

**1. Haddii aad u baahan tahay in aad fasax ka qaadato shaqada, sharciyo cusub ayaa kaa caawin kara in lacag lagu siiyo.**

- Fasaxa Waqtiga La Kasbaday ee Jirrada iyo Badbaadada waxa uu bilowday Janaayo 1, 2024. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa barta dli.mn.gov/sick-leave.
- Fasaxa Lacagta La Sii Qaadanayo waxa uu bilaabanayaa Janaayo 1, 2026. Booqo mn.gov/deed/paidleave/ si aad faahfaahinno uga hesho.

**2. Haddii lagugu leeyahay deyn caafimaad, waxaad leedahay xuquuq sharci.**

Laga bilaabo Oktoobar 1, 2024, Minnesota waxa ay yeelanaysaa sharci cusub oo la yiraahdo Xeerka Cadaalada Deynta. Waxa uu gacan ka geysanayaa ilaalinta dadka ku dhaqan Minnesota kuwaas oo lacag loogu leeyahay deyn caafimaad darteed. Sida uu dhigayo sharciga cusub:

- Seygaaga/xaaskaaga mas'uul kama noqon doono/doonto deyntaada caafimaad.
- Bixiyayaasha daryeelka caafimaadka kaagama joojin karaan daaweyn deyn caafimaad oo lagugu leeyahay darteed.
- Ururinta deynta caafimaadka ee anshax-darrada ah waa la joojiyay.
- Bukaanadu waxay dood gelin karaan hab socodka caafimaadka iyo khaladaadka biilasha.
- Deynta caafimaadka looma sheegi karo xafiisyada deymaha.

**3. Sharciyada ayaa kala duwanaan kara gobol kasta.**

Gudaha Minnesota, waxaaad xog waxtar leh oo lagu kalsoonaan karo ka heli kartaa:

- **Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota:** Waxa uu kaa caawin karaa kuwa been abuurka ah, deynta, arrimaha macaamiisha, iyo biilasha daryeelka caafimaadka. Booqo ag.state.mn.us ama wac (651) 296-3353 (gudaha Twin Cities), (800) 657-3787 (dibedda Twin Cities), ama (800) 627-3529 (Minnesota Relay).
- **LawHelpMN:** Waxa ay hayaan macluumaad ku saabsan kababka, arrimaha qoyska, guriyeynta, socdaalka, shaqada, canshuuraha, waxayna kaa caawin karaan inaad hesho qareen. Booqo lawhelpmn.org.
- **Cancer Legal Care:** Waxa uu bixiyaa caawimaad sharci oo loogu talagalay dadka ku nool Minnesota iyo la tacaalidda arrimaha la xiriira kansarka ee shaqada, caymiska, kababka naafada, iyo qorsheynta dhaxalka. Booqo cancerlegalcare.org ama wac (651) 917-9000.

**4. Haddii aadan shaqeyn karin, waxaad uqalmi kartaa kababka naafada ee Sooshal Sakuuratiga.**

- Caymiska Naafada ee Sooshal Sakuuratiga (SSDI) iyo Dakhli Sugidda Dheeraadka ah (SSI) waxaa loogu talagalay dadka aan shaqeyn karin muddada dheer iyada oo ay u sabab tahay jirro ama dhaawac. Looguma talagalain baahiyaha muddada gaaban ah. Waxaad koonto ka furan kartaa www.ssa.gov si aad u eegto kababka aad u qalmi karto..

**5. Waxaad xaq u leedahay in aad hadda sheegto rabitaanadaada.**

- Hadda ayaa ah waqtiga ugu wanaagsan ee rabitaanadaada loogu sheego qoyskaaga, asxaabtaada iyo kooxdaada daryeelka caafimaadka.
- Abuurista dukumiintiyo sharci sida dardaaranka daryeelka caafimaadka, awoodda qareenka dhaqaale, iyo dardaaran ayaa inta badan qalbi qaboojin u keena bukaanka iyo kuwa uu jecel yahay.